Bostads AB Mimer, Box 1170, 721 29 Västerås

Waxaad soo booqan kartaa bogga  mimer.nu
Xafiiska magaalada, Slottsgatan 33. Tel 021-39 72 10

# Qolalka Qashinka



mimer




mimer

RAGN-SELLS
En del av kretsloppet

# Maalinta fiican waxay ka bilaabataa guriga.

Haddii aad hayso suaalo hayso
soo wac teletoonka

Abdilaahi Hassan 0765-69 41 28

# En bra dag börjar hemma - Maalinta fiican waxay ka bilaabataa guriga

**Varför källsortera? - Waa maxay sababta qashinka loo kala guro?**

Ma ogtahay qashin kasta oo aad sax u kala gurto waxaa loo isticmaali karaa dib. Dhamaan dadka degan Mimer waxay leeyihiin meel qashinka la geeyo oo u dhow meesha ay degan yihiin. Hadaba in loo kala guro qashinka si sax ah aad iyo aad ayey muhiin u tahay.
Markaa waxaan doonaynaa in aad ka qayb qaadato oo aad kala gurto qashinka si sax ah maa-dada aad degan tahay Mimer. Warqadan waxaa ka heli doontaa qoraal iyo sawiro ku tusaaya sida aad u kala guri lahayd qashinka si sax ah, iyo dhamaan waxyaalaha aan la dhigi karin qolka qashinka balse aad geyn karto meesha alaabta lagu soo daadsho (återbruket).

**När du källsorterar bioavfall: Marka aad qashinka kala gurayso**

Ku rid haraaqa cuntada oo keliya kiishka qashinka ee buruunka ah. Kiishka qashinka ee buruunka ha ku ridin bac waayo bacdu  waxay huurin qashinka. Ha ilaawin in aad afka ka xirtid kiishka qashinka, si aan qashinku ugu daadan qolka.





## Matavfall - Haraaga cuntada

Kiishka qashinka ee buruunka ah waxaad ku ridaa oo keliya waxa ka soo hara waxyaalaha la cuno sida: hilibka, kaluunka, khudradaha, ukunta, daqiiqda ama burka, bariiska, baastada, roodhiga, keegaga ama toortooyinka, caleenta shaaha iyo kafeega, iwm Ogow kiishka qashinka ee buruunka ahi waa bilaash waxaadna ka heli kartaa qolka qashinka ee u dhow guriga aad degan tahay.




## Metallförbrukningar - Daasadaha iyo macdanta

Ma ogtahay in dib loo isticmaali karo  marar badan daasadaha iyo macdantaba, waxaad meel gaar ah ku guraysaa  daasadaha  sida,  kuwan sawirku ku tusaayo Ogow. Waa in aad dhaqdhaq-daa oo aad isku meel ku ridaa. Ka jar daboolka iyo waraaqda ku dhegan ee aan ahayn birta da-badeedna ku dar noocooda. Dhamaan waxyaalaha ay ku jiraan saliida iyo noocyada ranjiyada waxaad geynaysaa meesha la geeyo alaabta Återbruket




# Farligt avfall - Qashinka khatarta ah

Qashinka khatarta ahi waxa uu khatar ku yahay caafimmadka bini`aadanka iyo weliba beyàdda aynu ku noolahay, markaa waa muhiin in aan geyno allaabtaas khatarta ah meesha Återbruket sida: baateriga baabuurta,sunta, daawada sawirada, qayb ka mid ah waxyaalaha wax lagu nadiifiyo, baadroolka, saliida, ranjiga iyo xabagta,  koolada.

Ogow : hubi baakadaha ay ku jiraan waxyaalaha khatarta ahi in aaney daloolin. Qor waxa ku jira baakada. Daawooyinka soo hara waxaad geynaysaa farmasiga (apoteket) adigoo u kala saaraaya noocayda daawada.  Ha ku ridin/shubin musqusha waxyaalaha khatarta ah.



# Grovavfall - Allaabta guryaha

Allaabta guryaha lagu isticmaalo ee aaney qaadi karin meesha qashinku / miljöbodar waxaad geynaysaa meesha allaabta la geeyo återbruket. Ogow alaabta aan lageyn karin meesha qashinka waa: baaskiilada, sijaayadaha, allaabta caruurtu ku ciyaarto, kuraasta, sariiraha, miisaska, dhamaan kuwaas waxaad geyn Återbruket.



# Elavfall - Qalabka korontada

Qalabka korontada ku shaqeeya iyo kuwa baateriyada ku shaqeeyaba waxaa ku jira maado aan u fiicanayn caafimaadka dadka iyo beyàddaba markaa xusuusnow in aad geyso meesha allaabta lagu tuuro Återbruket. Ogow ha kala furfurin inta aadan geyn återbruket gaar ahaan TV iyo muraayadaha kumbuyuutaradda




## Mjuka och hårda plasförpackningar:
## Bacaha iyo caagagadaha adag

Waxaa  meel kuwada ridaa bacaha iyo caagadaha adag,  ka xir dhexda adiga oon dilaacin bacaha dabadeedna ku rid haanta loogu tala galay. Waxaa dhici karta in qaybo ka mid ah caagadaha adag ay dilaacaan haddii laysku dayo in burburiyo. caagadaha adag waa. Caagada kajabta, senabta, shaanbooyinka, baaldiyada, subaga iyo iskriimka ama jalaatooyinka iwm. Ogow! ku dhaqdhaq biyo qabow kana qaad daboolka laakiin kuwa sida saliida, xabadta ama koolada iyo ranjiyada waxaad geynaysaa meesha lageeyo (återbruket)




## Tidningar och returpapper - Joornaalada

Dhamaan noocyada joornaalka ku rid  haanta joornaalada oo keliya kuwaas oo ah. joornaalka maalinlaha, usbuuclaha, kuwa xayeysiiska, waraaqaha wax lagu qoro, buugta telefoonada iwm. Ogow! joornaaladu waa inay yihiin kuwo nadiif oo aaney ku ool cunto ama xabag (koolo), waa in aad ka jartaa xariga dhexda kaga xiran joornaaladada xayeysiiska haddii uu ku xiran yahay. ha ku ridin joornaalada iyagoo back u jira haanta.




## Pappersförpackningar -  Kartoonada

Waxaa dhici karta in baakaduhu isugu jiraan  caag iyo kartuun isku dhegan markaa waxaa jira sharci oranaayo haddii ay is leeyihiin inta caaga ah iyo inta aluumiyanta waa in la kala guraa. Baakaduhu waa: baakadaha caanaha, juusta, iyo dhamaan kuwa cabitaanada, koonfalakista, pasta, kuwa saabuunta iyo ukunta/ eega ku rid haantooda. Ogow! Kartoonada waaweyn sida Kartoonada TV, kumbuyuutarada iyo Kartoonada khudradaha , waxaad u kala jar jaraysaa qaybo yar yar si aanay meel weyn u qaadan. Kuwa cabitaanada, caanaha, waxaad ku dhaqd-haqaysaa biyo qabow waana isku yarayn.






## Glasförpackningar -  Dhalooyinka ama quraaradaha

Dhalooyinka ama quraaradaha waxaad u kala qaybinaysaa oo keliya 2 nooc kuwa midabka leh iyo kuwa aan midabaka lahayn. Ogow!  ha ku ridin kuwa ay ku jiraan saliida ama ranjiya. Lampor) guluubyada sawir

Mimer waxay  dhigtay sanduuq gaar u ah guluubyada qolka qashinka (miljöbodar) si loogu rido,  guluubyada yar yar, kuwa waaweyn. Waa muhiin in aad kurido iyagoon jajabin.



## Batterier - Baateriyada

Baateriyada badankood waxaad geyn kartaa meesha qashinka laakiin waxaad ku ridaysaa sanduuqa gaarka u ah. Ogow baaretiyada qayb ka mid ah waxaa ku jira maado Aysiidh ah sida kuwa baabuurta markaa gey (Återbruket)



## Restavfall -Haraaga qashinka

Marka aad kala soocdo qashinka wixii soo hara waxaad ku ridaysaa  sanduuqa haraaga sida: Banbarka, burusha ilkaha, dharka, kabaha, cudbiga, iwm. Waa muhiin kala gurida qashinka.